



**Xor u doorasho shaqo  
maalmeedka (loogu  
talogalay dadka  
lixaadkoodu dhimman  
yahay) sida aw dhigayo  
sharciga taageeridda  
dadka lixaadkoodu  
dhimman yahay  
qaarkood (LSS).**

Golaha degmada Göteborg wuxuu goʻaan ku gaaray in la hirgeliyo in shaqo maalmeedka loogu talagalay dadka lixaadkoodu dhimman yahay laga dhigo kuwo si xor ah loo doorto. Taas waxay la micne tahay in adiga haysta goʻaan sida aw dhigayo sharciga taageeridda dadka lixaadkoodu dhimman yahay qaarkood (LSS) aad kala dooran kartid ama inay Göteborg Stad kuu fuliso ama mid ka mid ah shirkadaha gaarka loo leeyahay kuwaasoo degmadu u oggolaatay ama heshiis la gashay.

### **(Shirkadda) Fulinaysa ma dooran karaa?**

Warbixin ku saabsan fuliyayaasha la dooran karo waxaad ka helayaas adeega [Jämför service goteborg.se/valjadagligverksamhet](http://Jämför service goteborg.se/valjadagligverksamhet). Waxaa kaa caawin kara gacanhayahaaga shirkadaha fuliyayaasha aad kala dooran kartid adigoo ka duulaya baahidaada goonidaa. Tirada fuliyeyaas-hu way kala duwanaan karaan xaafadaha kala duwan iyo wakhtiyada kala duwan.

### **Dadkee qusaysaa xor u doorashadu?**

Xor u doorashadu waxay qusaysaa oo keliya shaqo maalmeedka (loogu talagalay dadka lixaadkoodu dhimman yahay) sida aw dhigayo sharciga taageeridda dadka lixaadkoodu dhimman yahay qaarkood (LSS). Adiga iyo gacanhayahaaga baa isku raacaya inta saacadood ee aad ka qaybgalasiid shaqo maalmeedka. Göteborg Stad waxay shuruud ku xiraysaa dhammaan (Shirkadaha) fulinaya inay shaqo u diraan inta u dhexaysa 07.00-17.00 si haddii loo baahdo aad fursad ugu heshid shaqo maalmeedka loogu talagalay dadka lixaadkoodu dhimman yahay xilli buuxa (40 saacadood asbuucii).

### **Ma ku khasbanahay inaan doorto?**

Maya, ikhtiyaar baad u leedahay inaad dooratid. Haddii aadan waxba dooran waxaa lagu soo bandhigayaa shaqo maalmeedka gurigaaga ugu dhow oo leh qayb kugu haboon.

### **Sidee u dooranayaa?**

Waxaad dooranasaa fuliye adigoo kaashanaya gacanhayahaaga kaasoo kugu jihaynaya oo kugu taageeraya doorashadaada ayadoo laga duulayo baahiyaas-haada.

### **Maxaa dhacaya markaas doorto?**

Markii aad dooratid fuliye asagaa kula soo xiriiraya. Ayadoo laga duulayo goʻaanka gacanhayahaaga baad waxaad wada dejinaysaan qorshe ku aadan markaad bilaabi kartid iyo sidaad u rabtid shaqo maalmeedkaaga.

### **Doorashadayda ma beddali karaa?**

Waad beddalan kartaa fuliyaha adigoo aan sabab sheegin. La xiriir gacanhayahaaga si aad caawinaad ugu heshid dib u doorashadaada. Caadiyan waxay qaadataa labo bilood in la beddasho (shirkadda) fulinaysa, ayadoo shuruudu tahay inuu boos banaan jiro. Waxaa dhaqso badan haddii (shirkadda) fuliyahaaga ah hadda iyo tan cusub wax isku raacaan. Haddii awsan jirin boos ka banaan fuliyaha aad rabtid waxaad dooran kartaa inaad saf u gashid.



## **Wixii warbixin intaa dheer:**

[goteborg.se/valjadagligverksamhet](http://goteborg.se/valjadagligverksamhet)

Telefon: 031-365 00 00

E-post: [goteborg@goteborg.se](mailto:goteborg@goteborg.se)

Waxaad sidoo kale la xiriir kartaa gacanhayaaga.